# OGEYSIINTA DHAGEYSIGA DADWEYNAHA

## Kordhinta la Soo jeediyay ee Qiimaha Biyaha

Caasimada San Diego waxay soo jeedineysaa isbadelo saameynayo biilka biyahaaga.

Sannadkii hore, Caasimada waxay heshiis la gashay la taliyaha qiimaha oo madax bannaan si ay u sameeyaan daraasada qiimaha adeega ee adeegyada biyaha si loo qiimeeyo shuruudaha daqliga mustaqbalka. Daraasada waxay eegtay qarashaadka raasamaal ee la saadaaliyay, qarashaadka hawlgalka, qarashyada deynta iyo guud ahaan xasiloonida dhaqaalaha ee qarashka biyaha illaa sannadka maaliyadeed ee 2025. Daraasada waxay ogaatay in haddii qiimaha biyaha Caasimada aysan isbedelin, ma jirayaan daqli ku fillan ee lagu bixiyo adeegyada biyaha lagama maarmaanka ee sannadaha maaliyadeed ee 2024 iyo 2025.

**Sida la soo jeediyay, qiimaha biyaha waxay kordhinayaan boqolkiiba 10.2% laga bilaabo Diseembar. 1, 2023 iyo ilaa 8.7% Jan. 1, 2025**. Intaa waxaa dheer, Caasimada waxay raadineysaa inay ka gudubto qiimo kordhin walboo ay ku soo rogaan Maamulka Biyaha Gobolka San Diego. Hawlgalada iyo baahiyaha mashruuca ayaa la falanqeeyaa sannad kasta, kororka sanadaha mustaqbalka ayaa ka hooseyn karto tirooyinkan. Taariiq ahaan, Caasimada waxay fulisay in ka hooseysa korodhka la saadaaliyay sababtoo ah baahiyaha howlgalka ma gaaraan qiyaasaha qarashka ee daraasada qarashka adeega sababtoo ah isbedelada nidaamka iyo/ama waxtarka. Waaxda Qarashaadka Dadweynaha waxay qabaneysaa sadex kalfadhiyo dadweyne halkaas oo ay dagayaasha ka baran karaan warbixin badan oo ay su'aalo weydiiyaan ka hor dhageysiga dadweynaha **Sebteembar 19, 2023**. Jadwalka kal fadhiyada waxaad ka heleysaa websaydka Caasimada ee **sandiego.gov/rate-increases** oo waa la cusbooneysiinayaa haddii fursado lagu daro ama la bedelo.

## Warbixinta Dhageysiga dadweynaha

Dhegeysiga dadweyne waxaa lagu qabanayaa korodhka ugu badan ee la soo jeediyay ee qiimaha biyaha oo laga gudbo dalacaadyada sannadaha kalendarka ee 2023 illaa 2025.

**Dhageysiga dadweynaha waxaa la qabanayaa Sebteembar 19, 2023, saacada 2.pm 202 C St., 12th Floor, San Diego, CA 92101**

Fadlan ka eeg bogga dambe ee buug yarahaan wixii warbixinta ku saabsan sida aad uga qeybqaadan kartid. Gollaha Caasimada waxay maqlayaan oo ay tixgelinayaan marag furka afka iyo qoraalada la soo gudbiyay ee la xiriira korodhka qiimaha lagu soo jeediyay dhegeysiga. Gollaha Caasimada ayaa awood u yeelaneyso saxitaanka korodhka qiimaha la soo jeediyay oo jawaab u ah marag furka afka iyo qoraalada loo soo gudbiyay tixgelin. Kaliya bayaan qoran oo rasmi ah ayaa la tixgelinayaa sida waafaqsan Soo jeedinta Caasimada 218 habraacyada u qaabeysan bayaanka oo waa in la helaa kahor xiritaanka dhegeysiga dadweynaha midkood qof ahaan oo dhageysiga dadweynaha ama dhinaca boostada ee **City Clerk, 202 C St., MS 2P, San Diego, CA 92101**.



## Xagee ayay lacagta ku baxdaa oo Caasimada ka Aruuriso qidmooyinka biyaha?

Hubinta in San Diegans ay leedahay biyo nadiif ah waa qaali, qeyb ahaan sabab la xiriirto xeerarka gobolka iyo faderaalka ah inay Caasimada raacdo. Ku dhawaad boqolkiiba 59% oo miisaaniyada Sannadka Maaliyada 2024 ee Qarashaadka Dadweynaha ayaa la filayaa inay ku baxdo iibka biyaha dibada laga keeno halka 41% ka haray miisaaniyada waaxda lagu bixinayo dayactirka, casriyeynta iyo adeega deynta ee nidaamka biyaha Caasimada. Cusbooneysiinta iyo dayactirka nidaamkeena gaarsiinta biyaha waxay muhiim u tahay Caasimada si ay u sii wadaan u keenista biyo nadiif ah 1.3 milyan oo degayaasheena iyadoo la joogteynayo heerarka tayada adag.

**Mashaariicda cusbooneysiinta hadda waxaa ku jiro:**

- Maalgelinta xalalka taageerada macaamiisha oo si degdega oo waxtar ah wax looga qabanayo walaacyada macaamiisha joogtada ah.
- Hormarinta adkeysiga ee warshadaha daaweynta biyaha ee soo saaro malaayiin galoon biyo ah maalinkii oo gaarsiinta nidaamkeena u qeybinta oo 3,300-mayl ah.
- Bedelida 40 mayl ee dhuumaha sannad walba si loo yareeyo howlgabka dhuumaha.
- Kordhinta korontada tamarta la cusbooneysiin karo oo 1,910 kiilowatt (KW) illaa 2,766 KW si ay gacan uga geysato yareynta qiiqa gaaska aqalka dhirta iyo qarashaadka mustaqbalka fog.

Caasimada waxay sidoo kale sii wadaa maalgelinteeda Barnaamijka Biyaha Saafiga ah, barnaamijka dib u warshadeynta biyaha taariiqiga ah oo si weyn u yareyneyso baahida ay Caasimada ku soo iibsaneyso biyaha dibada laga keeno. Mashruuca Wajiga 1aad ee Biyaha Saafiga, Caasimada waxay amaahineysaa $733.5 milyan boqolkiiba 1.38%, taas oo badbaadineysa in ka badan $300 milyan qarashaadka dulsaarka laga fogaaday si loo yareeyo biyaha dibad laga keeno 40%. Barnaamijkeena kaabayaasha ugu weyn illaa iyo hadda, Biyo Saafi ah waxay siinayaan ku dhawaad kala bar saadka biyaha San Diego deegaan ahaan dhammaadka 2035.



## Maxay Qidmooyinka Biyaha u Kordhayaan?

Waaxda Qarashaadka Dadweynaha Caasimada San Diego (Waaxda) waxaa ka go’an inay ku bixiso adeega biyaha oo lagu xisaabtamo qaab qiimo jaban iyadoo la illaalinayo illaheena biyaha iyo caafimaadka dadweynaha. Waaxda ma soo saarto faa'ido oo taageero kama helaan Sanduuqa Guud ee Caasimada. Qaab dhismeedka qiimaha Caasimada waa inuu xisaabiyaa oo dejiyaa qiimaha si ay u muujiso baahida buuxda ee bixinta adeega biyaha. Waaxda waxay ku dadaalaysaa inay hoos u dhigto qarashaadka. Si kastaba, qarashaadka qaar, sida qiimaha iibka biyaha, ayaa ka baxsan xakameynta Waaxda. Caasimada waxay iibsataa in ka badan boqolkiiba 85% illaa 90% oo dhammaan biyahooda la cabo. Markii saadadka ay kordhiyaan qarashka biyahaan, Caasimada waa inay bixisaa wax badan. Intaa waxaa dheer, Caasimada waa inay maalgelisaa dayactirka joogtada ah iyo bedelka kaabayaasha gabooba si loo hubiyo in Waaxda ay bixiso adeeg lagu xisaabtami karo oo u hoggaansama xeerarka gobolka iyo federaalka. Caasimada waxay soo saartaa in deynta ay bixiso hagaajinadaan si markaas qarashaadka hormarinadaan loo siiyo bixiyayaasha qiimaha oo nolosha waxtarka ah ee kaabayaasha.

## Ma ogtahay?

Sida hay'ad dadweyne, Caasimada San Diego kama heli karto faa'idada adeegyada ay bixiso oo mana laga yaabo inay ku dalacdo wax ka badan qarashaadka la xiriiro adeegyo siinta macaamiishooda.

# Xarumaha Caasimada

**Waaxda Qarashaadka Dadweynaha waxay ka shaqeysaa oo ay illaalisaa nidaamka biyaha la cabbo ee degmada ugu badan oo ay ku jiraan:**





**keydiyayaasha**




**daaweynta biyaha dhirta**




**saldhigyada bamka biyaha**




**maylasha qeybaha biyaha**

## Qiimaha Biyaha LA SOO JEEDIYAY

Si loo hubiyo in macaamiisha loogu dalaco sida waafaqsan shuruudaha sharciga ah, Caasimada waxay si joogta ah u martaa nidaamka qarashka adeega halkaas oo qarashka lagu maamulayo qarashaadka lagu qoondeeyay sida waafaqsan saamiga saameynta heerka macaamil kasta ee nidaamka. Daraasada qarashka adeega ee la sameeyay 2022 ayaa ogaatay in haddii qiimaha biyaha Caasimada aysan isbedelin, ma jirayaan daqli ku fillan ee lagu bixiyo adeegyada biyaha lagama maarmaanka ee sannadaha maaliyadeed ee 2024 iyo 2025. Sida la soo jeediyay, qiimaha biyaha waxay kordhinayaan illaa boqolkiiba 10.2% oo Diseembar 2023 iyo illaa 8.7% oo Janaayo 2025.

### Caawinta Dhaqaalaha waa la Helayaa

Sawir koodka QR si aad wax badan uga ogaato sida aad ugu qalmi kartid Barnaamijka Caawinta Biyaha Qoyska Dakhliga Hoose ee California.

### Dalacaada Adeega Bil-laha Miitarka

| Cabirka Miitirka | Dalacaada Hadda | Diseembar. 1, 2023 | Jan. 1, 2025 |
|---|---|---|---|
| 5/8", 3/4" | $27.77 | $25.15 | $27.33 |
| 1" | $36.77 | $40.66 | $44.19 |
| 1.5" | $57.37 | $79.43 | $86.32 |
| 2" | $83.11 | $125.97 | $136.89 |
| 3" | $143.59 | $288.83 | $313.87 |
| 4" | $229.83 | $482.71 | $524.56 |
| 6" | $443.47 | $1,118.64 | $1,215.63 |
| 8" | $700.86 | $1,715.80 | $1,864.57 |
| 10" | $1,002.01 | $3,259.10 | $3,541.69 |
| 12" | $1,859.13 | $4,112.18 | $4,468.74 |
| 16" | $3,232.34 | $6,051.01 | $6,575.68 |

### Dalacaada Adeega Bil-laha Dabka

| Cabirka Miitirka | Dalacaada Hadda | Diseembar. 1, 2023 | Jan. 1, 2025 |
|---|---|---|---|
| 1" | $4.13 | $2.32 | $2.52 |
| 1.5" | $4.13 | $3.15 | $3.42 |
| 2" | $6.40 | $4.59 | $4.99 |
| 3" | $24.77 | $9.75 | $10.60 |
| 4" | $31.67 | $18.64 | $20.26 |
| 6" | $46.78 | $50.56 | $54.94 |
| 8" | $66.07 | $105.63 | $114.79 |
| 10" | $85.35 | $188.45 | $204.79 |
| 12" | $101.85 | $303.25 | $329.54 |
| 16" | $165.16 | $644.10 | $699.95 |
| 20" | $205.64 | $1,156.81 | $1,257.11 |

### Qiimaha Badeecada Biyaha

| Heerka Macmiilka | Dalacaada Hadda | Diseembar. 1, 2023 | Jan. 1, 2025 |
|---|---|---|---|
| Deegaanka Qoyska Kaliga ah | | | |
| Heerka 1 ($/HCF) | $5.55 | $6.40 | $6.95 |
| Heerka 2 ($/HCF) | $6.22 | $7.24 | $7.87 |
| Heerka 3 ($/HCF) | $8.88 | $9.12 | $9.91 |
| Heerka 4 ($/HCF) | $12.49 | | |
| Deegaanka Qoyska Badan ($/HCF) | $6.72 | $7.52 | $8.17 |
| Ganacsiga/Warshadaha/Caasimada Ka baxsan ($/HCF) | $6.55 | $7.33 | $7.97 |
| Waraabinta ($/HCF) | $7.45 | $8.62 | $9.37 |
| Dhismaha Ku meelgaarka ah ($/HCF) | $7.57 | $8.26 | $8.98 |

## Waxaad xaq u leedahay inaad ka faalootid korodhka qiimaha la soo jeediyay.

Bayaanka qoran waa inay wadataa bayaanka lidka ku ah qiimaha korodhka, tirada qeybta qiimeeyaha ama ciwaanka guriga iyo magaca iyo saxiixa milkiilaha guriga ama qarashka macmiilka ee diiwaanka ku qoran bayaanka. Foom ayaa laga helayaa bogga gadaal ee dokumentigaan. Kaliya hal foom ayaa lagu xisaabinayaa qeyb walba ama ciwaanka. Bayaanka elektarooniga ah (i-meelka, fariimaha warbaahinta bulshada, iwm) uma qalmeyso sida bayaan qoran sida waafaqsan sharuudaha gobolka. Sharciga gobolka qabo, dhageysiga dadweynaha waxaa laga siideynayaa Tv-ga Caasimada oo waxaa lagu daabicayaa websaydka **sandiego.gov/citytv**. Warbixin dheeraad ah ee ku saabsan helitaanka kulanka Gollaha iyo bayaanka dadweynaha waxaa laga helayaa onleenka **sandiego.gov/city-clerk/officialdocs/council-agendas-minutesresults**. Gababagada dhageysiga dadweynaha, Gollaha Caasimada waxay tixgelinayaan oo waxaa laga yaabaa inay ansixiyaan korodhka qiimaha. Bayaanada afka ah ee dhegeysiga dadweynaha waxaa tixgelinayo Gollaha Caasimada laakiin uguma qalmayaan sida bayaanada rasmi ah illaa ay wehliso bayaan qoran. Haddii, xiliga gabagabada dhageysiga dadweynaha, bayaanada qoran ee lidka ku ah korodhka qiimaha iyo ka dHAAfida dalacaadyada laguma soo bandhigin milkiilayaasha intoodan badan ama kireystayaasha masuulka ka ah bixinta qarashaadka guriga, Gollaha Caasimada waxaa loo ansixinayaa inay qaataan xalinta lagu kordhinayo ka dhaafida dalacaadyada iyo qiimooyinka biyaha iyo qarashaadka. Haddii la qaato, korodhka sannadaha kalandarka ee 2023 iyo 2024 waxay noqoneysaa kuwo waxtar leh **Dis. 1, 2023**, iyo ololaha warbixinta dadweynaha ayaa bilaabeyso hubinta wacyigelinta macaamiisha.

## Waa maxay dhaafida dalacaada?

San Diego waxay si weyn ugu tiirsan tahay biyaha laga keeno Waqooyiga California iyo Wabiga Colorado. Caasimada taariiq ahaan waxay soo iibsatay ku dhawaad boqolkiiba 85% illaa 90% oo baahiyahooda biyaha sannadlaha ah ee Maamulka Biyaha Gobolka San Diego (SDCWA), taas oo iyaduna ka soo iibsata biyaheeda Biyaha Magaalada ee Degmada Koonfurta California. Taariiq ahaan, SDCWA waxay kordhisaa qiimaha biyaha sannad walba. Korodhkaan wuxuu ku saleysanyahay qarashaadka SDCWA ee kaabayaasha, howlgallada, dayactirka iyo qarashaadka kale ee looga baahanyahay in loogu helo biyaha matalaada hay'adaha xubinta. SDCWA waxay ku dartaa dhammaan qarashaadkeeda dalacaadyadeeda biyaha kuwaas oo loo maro wakaaladaha xubnaha ka ah, sida Caasimada San Diego. Bisha Juun ee sannad walba, guddiga SDCWA waxay ansixiyaan korodhka qiimaha biyaha taas oo kordhineyso qarashaadka iibsiga biyaha Caasimada oo bilaabanayo sannadka xiggo Jan. 1. Caasimada waxay soo jeedineysaa ika dhaafida qarashka looga iibsanayo biyo SDCWA ee macaamiisha ku socoto.



Public Utilities
9192 Topaz Way
San Diego, CA 92123

PRESORTED
STANDARD
U.S. POSTAGE
**PAID**
SAN DIEGO, CA
**PERMIT 134**

# OGEYSIINTA DHAGEYSIGA DADWEYNAHA

## Sebt. 19, 2023 • 2 p.m. • 202 C St., Dabaqa 12aad

Iyadoo xubnaha dadweynaha ay u suurtogaleyso inay uga qeybgalaan kulamada Gollaha Caasimada qof ahaan, shirkaan ayaa laga siideynayaa talefishanka iyo onleenka tooska ah ee websaydka Caasimada, Maamulka Gollaha waxay sii wadayaan u diyaarinada dadweynaha inay ka faaloodaan iyagoo isticmaalayo aalada websaydka zoom.

- Linkiga loogu soo biiro Kalfadhiga Kulanka kumbuyuutar ahaan, tableet ama moBEelka casriga ah waa: **sandiego.zoomgov.com/j/1600982353**
- Ugu soo biirista taleefon ahaan: Soo garaac **1-669-254-5252**. Markii uu furmo, geli Aqoonsiga Kal fadhiga: **160 098 2353#**

**Dokumentigaan waxaa lagu helayaa**
ٱلْعَرَبِيَّةُ, 官話/官,
한국어, دری, فارسی,
*af Soomaali, español,*
*Tagalog, Tiếng Việt*

Wixii warbixin dheeraad ah oo sida looga qeybqaato, fadlan booqo: **www.sandiego.gov/cityclerk/participate**

## WARBIXIN MUHIIM AH OO KU SAABSAN QIIMAHA BIYAHAAGA

Ogeysiintaan waxaa ku siinaya Waaxda Qarashaadka Dadweynaha ee Caasimada San Diego sida waafaqsan Dastuurka California Qodobka XIIID (sidoo kale loo yaqaan "Soo jeedinta 218"). Sida waafaqsan shuruudaha Soo jeedinta 218, Caasimada waxaa looga baahanyahay inay ogeysiiso milkiilayaasha guryaha diiwaanka isbedelada la soo jeediyay ee qidmooyinka la xiriirto guriga, sida adeega biyaha iyo biyaha wasaqda.

Tani waxay u adeegtaa sida ogaysiis ahaan oo in Gollaha Caasimada ay qabanayaan dhageysiga dadweynaha, oo waqtiga, taariiqda iyo goobta lagu qeexay kor, si loo tixgeliyo saxitaanada lagu talliyay ee qiimaha iyo dalacaadyada adeega biyaha Caasimada. Haddii la ansixiyo, saxitaanada la soo jeediyay ayaa kowdii ka soo baxayo biilasha oo bilaabanayo gudaha Diseembar 2023. Dhammaan xubnaha dadweynaha waxaa lagu casuumayaa inay ka qeybgalaan dhageysiga dadweynaha. Intaa waxaa dheer, sida waafaqsan sharciga gobolka California, dhammaan milkiilayaasha guryaha iyo macaamiisha diiwaanka waxay u soo gudbin karaan bayaan qoraal ah isbedelada qiimaha la soo jeediyay. Bayaanka boostada lagu soo diro waa in la helaa **Sebt. 19, 2023**. Kaliya hal bayaan qeybtiiba waa la ogolyahay.

Dhammaan bayaanada qoran waa la xaqiijinayaa. Waxaad sidoo kale ka soo muuqan kartaa dhageysiga dadweynaha ee taariiqda iyo waqtiga kor lagu qeexay. Warbixin dheeraad ah waxaa laga helayaa onleenka ee: **sandiego.gov/rate-increases**.

Bayaanka qoran waa in lagu soo diraa bashqad ama la soo gaarsiiyaa: **City Clerk, 202 C St., MS 2P, San Diego, CA 92101**.

Anigoo ah ______________________________ waan ka soo horjeedaa kordhinta qiimaha la soo jeediyay.

Lambarka Qeybta Qiimeeyaha ama Ciwaanka: ______________________________

Saxiixa: ______________________________